

## Wargelinta Dhicitaanka U-qalmitaanka Da'da Tobanaad (10) Notification of Age Ten (10) Eligibility Expiration

MAGACA IYO CINWAANKA MACMIILKA

MAGACA IYO CINWAANKA WAKIILKA MACMIILKA

Ilmahaaga hadda la joogo wuxuu macmiil u yahay Maamulida Naafuoyinka Koritaanka (DDA). U-qalmitaanka ilmahaaga ee DDA waxay dhaceysaa maalinteeda/maalintiisa dhalashada ee tobonaad. Si ilmahaaga uu ugu sii qalmo DDA, waa in aad dib-u codsatid kahor inta ilmahaaga uusan gaarin da'da tobonaad. Ilmahaaga waa in dib loogu sii diiwaangeliyo iyada oo la hoostagayo mid ka mid ah shuruudahan soo socda:

Naafonimo Maskaxeed, Maskax Suux, Qallal, Maskax Dhimannaan (Autism), Mid Kale oo Dareemeyaasha Jira ama Xaalad Kale ah oo la mid ah Naafonimo Maskaxeed.

Waxaan ku soo lifaaqay *Jadwalka Dokumeentiyada loo baahan yahay* si aan kuu ogeysiino waxa loo baahan yahay si loo sameeyo dib-u go'aamintan.

### Sida dib loogu codsado:

La Xiriir shaqaalaha U-qalmitaanka iyo Qaadashada ee DDA ugu yaraan 90 maalmood ka hor maalinta dhalashada tobonaad ee ilmahaaga si aad u codsato xirmo dib-u codsasho. Waxaad ku sameyn kartaa tani qoraal ama adiga oo wacaya taleefoon lambarka ee lagu qoray hoos. Xirmada codsigada waxaa laguugu soo dirayaa boostada. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa dokumeentiyada codsiga onlineka adiga oo booqanaya

<https://www.dshs.wa.gov/dda/consumers-and-families/eligibility>.

### Maxaa dhacaya haddii aanan dib-u codsan?

Haddii aanan codsan xirmo dib-u codsi ama haddii aanan soo celin codsiga ugu yaraan 60 maalmood ka hor maalinta dhalashada tobonaad ee ilmaheena, U-qalmitaanka ilmahaaga ee DDA waxay dhacayaan maalintiisa/maalinteeda dhalashada ee tobonaad. Haddii ilmahaaga uu ka helo adeeg lacagtiisa la bixiyo DDA, adeeggan wuxuu dhammaanayaa maalintiisa/maalinteeda tobonaad ee dhalashada.

**Dhicintaanka u-qalmitaanka DDA ma saameynayso ka qaybgalka barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah ama u-qalmitaanka SSI, mana saameynayso adeeg kasta oo DSHS kale ee laga yaabo in aad qaadnayso, sida Medicaid, TANF, ama boonooyinka cuntada.**

Fadlan ugu jawaab sida ugu dhaqsiyaha badan ee suurtagalka ah, balse ugu yaraan 90 maalmood ka hor maalinta dhalashada tobonaad ee ilmahaaga. Haddii aanan war kaa helin, waxaan u qaadnaynaa in aanan doonayn sii-wadiida u-qalmitaanka ilmahaaga ee DDA. La'aanta dokumeentiga habboon ee xaaladda loo qalmayo ee da'da 10, u-qalmitaanka ilmahaaga ee DDA iyo adeegyada DDA waxay dhacayaan maalintiisa/maalinteeda dhalashada ee tobonaad (10<sup>aad</sup>).

Haddii aad qabto su'aalo ama doonayso in aad codsato xirmo, fadlan la xiriir:

---

MAGACA

LAMBARKA TALEEFOONKA

CINWAAN IIMAYL

Nuqulka sharciyada gobolka ee xukminaya u-qalmitaanka (WAC 388-823) waxaa la heli karaa marka la codsado ama waxaa laga heli karaa online-ka <https://www.dshs.wa.gov/dda/consumers-and-families/eligibility>.

Lifaaqyada: *Jadwalka Dokumeentiyada Loo Baahan Yahay*

Cc: Faylka macmiilka  
Wakiilka Sharciga

**Jadwalka Dokumeentiyada Loo Baahan Yahay**

<b>XAALADDA NAAFONIMADA</b>	<b>DA'DA</b>	<b>OGAANASHA NOOCA CUDURKA</b>	<b>TAKHTARKA OGAADAY NOOCA CUDURKA</b>	<b>DIIWAANADA KALE</b>
Naafonimo Maskaxeed	Da'da 4 iyo ka weyn	Naafonimo Maskaxeed (ee hore loo oran jiray Maskax Dhimanaan)	Cilmi-nafsi yaqaan Shatiyaysan, Cilmi-nafsi-yaqaanka Dugsiga ee Haysta Shahaado Washington ama cilmi-nafsi-yaqaan dugsi kale oo uu shahaado siiyay Ururka Qaranka ee Cilmi-nafsi-yaqaanada Dugsiga	Warbixin Nafsiyeed dhammeystiran darajada Qiyaasta Caqliga (IQ) oo dhammeystiran ee ah in ka badan labo ka weecsanaan ee heerkii la rabey oo ka hooseeya cel-celiska, iyo darajada imtixaanka xirfadaha la qabsashada ee ka badan labo ka weecsanaan oo ka hooseysa cel-celiska.
Maskax Suux	Da'da 4 iyo ka weyn	Maskax Suux Curyaamista lugaha iyo gacamaha oo dhan Curyaanimada dhinac ka mid ah jirka Curyaanimada qaybaha jirka ee iska soo horjeeda	Takhtar Shatiyeysan	Bilowga ka hor da'da 3 jir, iyo macluumaadka taageeraya baahiyada loo qabo gargaar jireed toos ah ee maalin kasta ee labo meelood ama in ka badan (musqul galidda, qubaysashada, cunidda, dhar xirashada, dhaqdhaqaaqa, ama wargaarsiinta).
Qallal	Da'da 4 iyo ka weyn	Qallal ama Xanuun suuxdin	Takhtarka Dareemeyaasha ee uu Guddi Shahaado Siiyay	Oggaanshaha nooca cudurka oo ku saleysan taariikhda caafimaad iyo baaritaanka dareemeyaasha, xaqiijin laga helay takhar ama takhtarka dareemeyaasha ee suuxdin aan la xakameyn oo sii-socota ama soo noqnoqota, iyo imtixaanka xirfadaha la qabsashada ee muujinaya xaddad xoog leh ee shaqaynta la qabsashada ee in ka badan labo ka weecsanaan heerka caadiga ah ee ka hooseeya celceliska.
Maskax Dhimanaan (Autism) (iyada oo la eegayo DSM-IV)	Da'da 4 iyo ka weyn	Maskax Dhimanaan (Autism) ama Xanuunka Maskax Yara Dhimanaan iyada oo la eegayo 299.00 ee DSM-IV-TR	Takhtarka Cilmi-nafsi oo Shatiyaysan, Kalkaalisada Heerka Sare ee Diiwaangashan (ARNP) ee La xiriirta Xaaladda Maskax Dhimanaanta (Autism) ama xarunta koritaanka ama Guddi Shahaado Siiyay: Takhtarka Dareemeyaasha, Takhtarka Dhimirka, ama Takhtarka Carruurta ee Dabeecadda iyo Koritaanka	Qiimeyn dhammeystiran iyada oo la eegayo DSM-IV buuxinaya shuruuda ogaanshaha nooca cudurka, daliil dib-u dhac ama shaqaynta aan caadiga ahayn ee ka hor da'da 3 ee bulshada, luuqadda, xirfadaha wargaarsiinta ama ciyaarta summadeed ama hindiseed, iyo imtixaanka xirfadaha la qabsashada ee muujinaya xaddadka shaqaynta la qabsashada oo ka badan labo ka weecsanaan ee heerka caadiga ah ee ka hooseeya celceliska.
Kulmiyaha Xanuunka Maskax dhimanaanshaha (iyada oo la eegayo DSM-V)	Da'da 4 iyo ka weyn	Kulmiyaha Xanuunka Maskax dhimanaanshaha 299.00 Iyada oo la eegayo DSM-V oo ay ka mid yihiin heerarka darnaanshaha 2 ama 3 ee labada saf ee gudban	Takhtarka Cilmi-nafsi oo Shatiyaysan, Kalkaalisada Heerka Sare ee Diiwaangashan (ARNP) ee La xiriirta Xaaladda Maskax Dhimanaanta (Autism) ama xarunta koritaanka ama Guddi Shahaado Siiyay: Takhtarka Dareemeyaasha, Takhtarka Dhimirka, ama Takhtarka Carruurta ee Dabeecadda iyo Koritaanka	Qiimeyn dhammeystiran iyada oo la eegayo DSM-V buuxinaya shuruuda ogaanshaha nooca cudurka, daliil dib-u dhac ama shaqaynta aan caadiga ahayn ee ka hor da'da 3 ee bulshada, luuqadda, xirfadaha wargaarsiinta ama ciyaarta summadeed ama hindiseed, imtixaanka xirfadaha la qabsashada ee muujinaya xaddadka shaqaynta la qabsashada ee ka badan labo ka weecsanaan ee heerka caadiga ah, iyo FSIQ ee ah hal ka weecsanaan ee heerka caadiga ah ama in ka badan oo ka hooseeya cel-celiska – ama – ka soo baxa dhammaan shuruudaha loogu talagalay Xanuunka Maskax Yara Dhimanaanta (Autistic) 299.00 iyada oo la eegayo DSM-IV.
Dareemeyaal kale ama Xaalad Kale oo la mid ah Naafonimada Aqliga	Da'da 4 iyo ka weyn	Xanuun dareemeyaasha ama koromosoomyada ee la garanayo in ay sababaan yaraanshaha xirfadaha la qabsashada iyo caqliga	Takhtar Shatiyeysan	Darajada Qiyaaska Caqliga (IQ) ee dhammeystiran ee ka badan ka weecsanaanta heerka caadiga ee ah 1.5 oo ka hooseysa cel-celiska, iyo imtixaanka xirfadaha la qabsashada ee muujinaya xaddad xoog leh ee shaqaynta la qabsashada ee in a badan labo ka weecsanaanta heerka caadiga ah oo ka hooseysa cel-celiska.

**Fiiro gaar: Foomkan waa kaliya hage guud DDA-na waxay u baahan kartaa macluumaad dheeraad ah ama qiimeynyo. Dokumeentigan waa tallaabada koowaad ee go'aaminta u-qalmitaanka. U-qalmitaanka DDA waxaa go'aamiya sharciga WAC Cutubka 388-823.**